Xoojiyaha Kuurada COVID-19

Waa maxay xoojiyaha kuuradu?

Xoojiyaha kuuradu waa kuuro talaala kaaso la siiyo ka dib dhameysashada talaal isku xigxiga. Dadku waxay leeyiiin jawaab difaac ku filan ka dib helida talaalka saxda ee hore; haseyeeshee, taas way dafiictaa mudo ka dib. Kuuro xoojin ayaa la siiyaa si loogu xoojiyo jawaabta difaaca oo loogu kordhiyo difaaca uu talaalku siiyo.

Helida kuurada talaalku maaha wax cusub. Inta badan dadweynaha Mareykanku waxay heleen kuurada xoojinta ee talaal kale oo lagu taliyey (sida, dabaysha, teetanada) intay nool yihiin.

Yaa lagula taliyey inay helaan xoojiyaha kuurada?

Xarunta Xakameynta Xanuunada (CDC) waxay ku talisa hal kuuro oo xoojiyaha Pfizer ee talaalka COVID-19 ah mudo lix bilood ka dib dhameysashada talaalka Pfizer COVID-19 ee hore kooxahan soo socda:

- Dadka 65 jirka ama ka weyn
- Kuwa ku nool xarumaha daryeelka mudada dheer
- Dadka da'aha 50-64 ee leh xaalado caafimaad ee lala noolaado (kansarka, xanuunka kalyaha ee lalanoolaado, xanuunka sanbabada ee lala noolaado, xanuunada sababada, asaasaqa, down syndrome, xaalado wadno, HIV, difaac liidasho, xanuunka beerka, miisaanka badan/baruurta, xaamilada, xanuunka dhiiga, qiiq cabane imika ama hore, unug adag/unug la abaqaalo, faalug, walxaha carqaladeeya)

CDC waxay sidoo kale ku talinaysaa in kooxahan soo socdaa heli karaan xoojiyaha kuurada talaalka Pfizer kadib qiimeynta faa'idooyinkooda iyo khataraha:

- Dadka da'doodu tahay 18-49 sano ee leh xaalado caafimaad ee lala noolaado
- Dadka da'doodu tahay 18-64 sano ee khatar ugu jira qaadista COVID-19 iyo gudbinta waayo deegaan shaqo ama haayadeed awgeed

Waa maxay sababta xoojiyaha kuurada talaalka COVID-19 loogu taliyey?

COVID-19 waxtarka talaalka ee caabuqa (lahaanshaha astaamaha COVID-19) hoos ayuu u dhacay mudo ka dib iyo sidoo kale nooca Delta awgii. Wax ka tarka caabuqa wuu sareeyaa (cisbitaal dhigida iyo dhimashada), lakiin hoos ayuu usoo dhacaya kuwa 65 ama ka weyn.

Xogta Pfizer tijaabada shaybaadhku waxay muujinaysaa jawaab difaac horumarsan ka dib xoojinta kuurada, oo si weyn u kordhisay difaaca COVID-19. Intaasi waxa dheer, xogta laga helay Israel waxay muujinaysaa xoojinta kuurada Pfizer inay yareysay caabuqa iyo xanuunka daran. Xogta laga helay tijaabada shaybaadhka Israel waxay muujinaysaa in dhibaatooyinka xoojinta kuuradu la mid tahay waxa lagu arkay ka dib kuurada labaad markii la siiyey.

Shaqooyinkee ayaa loo tixgaliyaa inay khatar ugu jiraan COVID-19?

- Shaqaalaha gargaarka degdega (shaqaalaha caafimaadka, dabdamiska, booliiska, shaqaalaha kulamada waaweyn)
- Shaqaalaha waxbarashada (macalimiinta, shaqaalaha caawimada, shaqaalaha daryeelka maalintii)
- Shaqaalaha cuntada iyo beeraha
- Shaqaalaha waxsoosaarka
- Shaqaalaha sixitaanka
- Shaqaalaha Adeegyada Boostooyinka Mareykanka
- Shaqaalaha gadiidka daweynaha
- Shaqaalaha Booshariyada

Miyaan u baahanahay cadeynta xaalad caafimaad oo leeyahay ama shaqadayda saan u helo xoojiyaha kuurada?

Ma jirto wax warbixin xaalad caafimaad ama shaqadaadu waa waxa aad ugu baahan tahay inaad heshid xoojiyaha kuurada.

Ka waran shakhsiyaada helay nooc talaalkale oo COVID-19?

Imika ma jirto xog ku filan si loo go'aamiyo haddii shakhsiyaadka helay nooc kale oo talaalka COVID-19 u baahdaan xoojiyaha COVID-19. Ilmika, shakhsiyaad helay qeybaha talaalka Moderna ama Johnson & Johnson **ma** heli doonaan xoojiyaha talaalka.

Kuma jiro bulshadan. Miyaan ku haboonaanayaa xoojiyaha kuurada?

Shakhsiyaadka kale waxa lagula talin karaa inay helaan xoojiyaha kuurada mustaqbalka. Waaxda Caafimaadka North Dakota ayaa ku wargalin doonta talooyinkaasi haddii wakhtigu saamaxo.

Tani macneheedu ma in talaalka COVID-19 aanu waxba tarayn baa?

Ku talintani macneheedu maaha in talaalka COVID-19 aanu shaqeynayn. Heerar cisbitaal dhigidu waa 10-22 in badan waayeelka aan la talaalin marka loo eego waayeelka la talaalay. Dadka la talaalay ayaa shan jeer ka yar inay qaadaan COVID-19 mar loo eego kuwa aan la talaalin. Waxtarka talaalku hoos ayuu u dhigay caabuqa (yeelashada astaamaha COVID-19) lakiin wali waa difaac ka dhana cisbitaal dhigista iyo dhimashada. War ka tarka cisbitaal dhigistu hoos ayey u dhacday kuwa 65 jir ama ka weyn.

Miyuu xoojiyaha kuuradu ka duwan yahay kuurada dheeriga ah?

Haa, dadka u yara nugul difaac xumada ee markii hore helay talaalka Pfizer ama Moderna COVID-19 aya lagula talinayaa inay helaan kuuro dheeriya oo ah talaalka Pfizer ama Moderna. Kuurada dheeriga ah waxa la siyaa ugu yaraan 28 cisho ka dib dhameysashada kuwa hore. Dadka difaacoodu liito talaalka hore waxba uma taro waxayna u baahan yihiin saddex kuuro si difaac u helaan.

Miyaan u baahanahay xoojiyaha kuurada si la iigu tixgaliyo inaan si dhameystiran u talaalanahay?

Maya. Ujeedooyin caafimaad dadweyne awgood, dadka waxa loo tixgalinaayo inay si dhameystiran u talaalan yihiin labo todobaad ka dib helitaanka labada kuuro Pfizer ama Moderna ee talaalka COVID-19 ama kuurada ee talaalka COVID-19 Johnson & Jonhson.

Halkee ayaan iska talaali karaa?

Macluumaad badan oo bixiyayaasha talaalka COVID-19 ee kuu dhow waxaad ka heli kartaa NDDoH boga talaalka COVID. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa NDDoH 1.866.207.2880 wixii caawimo ah.

La cusbooneysiiyey 09/28/2021